UK Health
Security
Agency

# Hawo is-dhaafka lagu yareynayo faafitaanka caabuqyada neef-mareenka, oo uu ku jiro COVID-19

## Hawo is-dhaafka waa maxay, maxeyna muhiim u tahay

Hawo is-dhaafka waa habka lagu soo geliyo hawo cusub meelaha gudaha ah iyada oo meesha laga saarayo hawada duugowday. Ku soo daynta hawada cusub meelaha gudaha ah waxay kaa caawin kartaa in meesha laga saaro hawada ay ku jiraan walxaha fayraska iyo ka hortagga faafitaanka coronavirus (COVID-19) iyo caabuqyada kale ee neef-mareenka sida hargabka. Hawo is-dhaaf wanaagsan ayaa sidoo kale lala xiriiriyay faa'iidooyinka caafimaadka sida hurdo wanaagsan iyo maskax-feejignaan, iyo inay yaraadaan maalmaha shaqada ama iskuulka jiro looga maqan yahay.

Marka qof qaba caabuqyada fayraska ah ee neef-mareenka uu neefsado, hadlo, qufaco ama hindhiso, waxay siidaayaan dhibco yaryar kuwaas oo ay ku jiraan fayraska keena caabuqa. Dhibcahan waxay gaadhi karaan indhaha, sanka ama afka qof kale ama waxaa neefsan kara qof kale. Dhibcaha waxa kale oo ay ku dhici karaan sagxadaha oo ay u gudbin karaan dadka iyada oo la taabanayo.

In kasta oo dhibcaha waaweyn ay si dhakhso leh dhulka ugu dhacaan, haddana dhibco yaryar iyo aerosol ayaa meelaha gudaha

ah hawada ku jiri kara in muddo ah, oo ay ku jirto ka dib marka qof qaba caabuqa uu ka tago goobta. Meelaha hawo is-dhaafku ay xun tahay qadarka fayraska neef-mareenka ee hawada ku jira ayaa ururi kara, iyada oo kordhineysa halista faafitaanka, gaar ahaan haddii ay qolka ku jiraan dad badan oo caabuqa qaba. Halista isugu gudbinta hawadu waxay kordhaysaa marka dadka ku jira meel xiran ay ka qayb qaadanayaan dhaqdhaqaaq firfircoon, sida jimicsi, qeylin, heeso ama hadal cod dheer ah.

Soo gelinta hawo cusub qolka iyada oo meesha laga saaro hawada duugowday ee ay ku jiraan qurubyada fayraska ayaa yaraynaysa fursada faafinta caabuqyada. Mar kasta oo hawo nadiif ah gudaha la soo geliyo, waa dhakhsaha wixii fayras ah ee hawada ku jira looga saaro qolka.

Hawo is-dhaafka kama hortagayso faafitaanka caabuqyada neef-mareenka ee ku yimaada istaabasho dhow, waana mid ka mid ah tallaabooyinka aad qaadi karto si caabuqyada neef-mareenka, oo uu ku jiro COVID-19loogula noolaado si badbaado leh.

## Waxa aad sameyn karto si aad u wanaajiso hawo is-dhaafka

Sida aad u ilaaliso ama u hagaajiso hawo is-dhaafka waxay ku xirnaan doontaa booska iyo dhismaha. Dhismayaasha waxaa hawo siiya habab dabiici ah sida hawo-mareenada, daaqadaha iyo shooladaha, ama nidaamyada makaanikada sida marawaxadaha soo saara ama qaboojiyaha, ama labadaba isku darka. Meesha aysan suurtogal ahayn in la keeno hawo cusub, hawo nadiif ah oo waxtarkeedu sarreeyo (HEPA) ama ultraviolet (UV) ayaa xaaladaha qaarkood waxtar u yeelan karta yaraynta halista caabuqa.

## Hawo is-dhaaf u samee gurigaaga

Isu socodka hawadu waa tan ugu muhiimsan haddii qof qoyskaaga ka tirsan uu qabo COVID-19 ama fayras kale oo neef-mareenka ah, si aad isugu daydo oo aad u joojiso faafida fayraska.

Hawo is-dhaafka dabiiciga ah ee guriga

Dadka badankiisa furitaanka daaqadaha iyo albaabada guriga ayaa ah habka ugu fudud ee lagu hagaajin karo hawo is-dhaafka.

Haddii dariishadaha ay ka furan yihiin xagga sare iyo xagga hooseba (sida daaqadaha saqafka), adeegsiga furitaanka sare oo keliya waxay kaa caawinaysaa in hawada cusubi soo gasho ay diirimaad noqoto marka ay ku qasanto hawada qolka, iyadoo yaraynaysa qabowga. Cimilada diiran, isticmaal labada dalool ee sare iyo kuwa hooseba maxaa yeelay arintani waxay kaa caawin doontaa in la helo hawo isu socod ka badan. Furitaanka daaqadaha iyo albaabada dhinacyada iska soo horjeeda ee qolkaaga ama gurigaaga waxay sidoo kale ku siin doontaa qulqul wanaagsan oo hawo cusub ah (arintani waxaa loo yaqaan hawo is-dhaaf isu talawsan).

Hubi in daloollada yaryar (daloolo yaryar oo badanaa ku yaal xagga sare ee daaqadda) ama firileyda ay furan yihiin oo aan la xirin. Hawada ka soo burqanaysa dalooladan ayay isku darsami doonaan hawada qolka ee diiran marka ay soo galayso, taas oo ka caawinaysa in qolka heerkulkiisu raaxo lahaado.

Daaqadaha uma baahna inay furnaadaan mar walba si loo hagaajiyo hawo is-dhaafka. Soo gelinta qolka hawo cusub adiga oo furaya albaab ama daaqad, xattaa dhowr daqiiqadood markiiba, waxay caawisaa in meesha laga saaro hawada duugowday oo ay ku jiraan qurubyada fayraska waxayna yaraynaysaa fursada faafida caabuqyada.

Hawo is-dhaafka gurigaaga macnaheedu maaha inuu qaboow noqdo. Haddii aad tahay 65 ama ka weyn, ama haddii aad leedahay xaalad caafimaad oo mudo dheer ah, waa inaad heerkulka qolka aad ku jirto ku ilaalisaa ugu yaraan 18 ° C, inkasta oo laga yaabo inaad doorbidayso inuu sidan ka sii kululaado. Heerkulka guriga ee joogtada ah ama ka hooseeya 18°C waxaa kale oo laga yaabaa inuu saameeyo caafimaadka dadka da'da yar iyo kuwa aan lahayn xaalado caafimaad oo waqti dheer ah.

Cimilada qabow, ee aysan aan la xamili karin in daaqadaha si buuxda loo furo, in yar oo daaqadaha la furo waxay sidoo kale siin kartaa hawo, waxayna horseedi kartaa qabow yar. Cimiladu waxay saameyn kartaa xadiga hawada ee marta meelaha furan. Cimilada qabow ama

ay dabayshu jirto, furitaan yar ayaa waxtar u yeelan kara soo gelinta hawo cusub si u dhiganta furitaanka weyn marka cimiladu degan tahay oo diiran tahay.

Waxaa jira talo ku saabsan sida loogu sugnaado diirimaad iyo wanaag. Haddii ay dhibaato kaa haysato kululaynta gurigaaga, waxaa laga yaabaa inaad awoodo inaad dalbato kaalmo dhaqaale iyo mid hawlqabad xitaa haddii aadan lahayn guriga. Booqo bogga internet-ka Talo-siinta Tamarta ee Fudud, si aad u hesho macluumaadka ku saabsan kaalmada la heli karo ama wac khadka caawinta 0800 444 202. Offgem waxay haysaa talo-bixin dheeraad ah oo ku saabsan waxaad samaynayso haddii aad ku dhibtoonayso inaad bixiso biilasha tamarta.

Markaad raadinayso inaad keento hawo nadiif ah, waa inaad ka fikirtaa dhinacyada kale ee badbaadada iyo amniga (tusaale, furnaan haku hayn albaabbada dabka).

## Hawo is-dhaafka aan makaaniga ah ee guriga

Haddii gurigaagu leeyahay nidaam hawo is-dhaaf makaanik ah, hubso in nidaamkani shaqaynayo oo lagu hayo dayactir waafaqsan hagista kuwa soo sameeyey. Dejinta hababka hawo-qaadista si ay hawo cusub u soo geliso oo aan dib loogu wareejin hawada gudaha waxay kaa caawin doontaa in laga saaro qurubyada fayraska. Aaladaha dib u wareejiya hawada gudaha kaliya kama saari doonaan guriga fayraska hawadu qaado.

## Haddii qof qoyska ka mid ahi uu la jiran yahay caabuqa neef-mareenka

haddii qof reerka ka mid ahi uu la jiran yahaycaabuq neef-mareenka ah, in daaqad qolkiisa ahi ay yare furnaato, iyada oo uu albaabkuna xidhan yahay ayaa caawimo ka noqonaysa yareeynta faafitaanka hawo wasakhaysan oo ku faafta qaybaha kale ee guriga. Haddii ay u baahan yihiin iney isticmaalaan meel ka mid ah meelaha la wadaago ee guriga, sida jikada ama meelaha kale ee la deggan yahay inta ay dadka kale joogaan, meelahaas oo hawo is-dhaaf wanaagsan la siiyo, tusaale ahaan adiga oo furaya daaqadaha marka la isticmaalayo, iyo

muddo ugu yaraan 10 daqiiqo ka dib markii ay ka baxeen ayaa caawineysa.

Haddii aad gurigaaga ku haysatid nidaam hawo is-dhaaf makaanik ah, waxaad isticmaali kartaa qeybta boost mode (haddii uu leeyahay) si aad u kordhiso hawo is-dhaafka haddii qof qoyska ka mid ahi la jiran yahay caabuq neef-mareenka ah. Hawo is-dhaafka waxaa sidoo kale loo kordhin karaa in loo daayo marawaxadaha hawada saara ee suuliyada iyo jikooyinka iyaga oo soconaya wax ka badan intii caadiga ahayd, iyada oo albaabku xiran yahay, ka dib marka uu qof qolka ku jirey.

Waxaa jira hage dheeraad ah oo loogu talagaley dadka leh astaamaha caabuqa neef-mareenka oo uu ku jiro COVID-19.

## Hawo is-dhaafka goobaha shaqada iyo meelaha aan deegaanka dadka aheyn

Hawo is-dhaaf wanaagsan waxaa uu yareynayaa faafitaanka caabuqyada neef-mareenka, oo uu ku jiro COVID-19, ee goobaha shaqada iyo meelaha aan deegaanka dadka aheyn.

Hay'adda Health and Safety Executive (HSE) waxay bixisaa hagid la xidhiidha sida loo qiimeeyo loona hagaajiyo hawo is-dhaafka iyada oo waafaqsan waajibaadka caafimaadka iyo badbaadada sida ay dhigayaan Xeer-hoosaadyada Goobta Shaqada ee (Caafimaadka, badbaadada iyo Daryeelka) ee 1992. Waxaa jira macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan ficilada ay sameyn karaan loo-shaqeeyayaashu ee yarayn kara faafitaanka caabuqyada neef-mareenka ee goobaha shaqada. Hagaha gaarka ah ee COVID-19 oo faahfaahsan oo loogu talagalay goobaha shaqada iyo dhismayaasha dadweynaha waxaa bixiya Chartered Institution of Building Services Engineers (CIBSE) iyada oo loogu talagaley kuwa doonaya in ay sameeyaan tallaabooyin dheeraad ah.

Qiimaynta shuruudaha iyo waxqabadka nidaamyada hawo is-dhaafka ee deegaanno badan ayaa u baahan khibrad injineernimo. Haddii aadan hubin, talo ka raadso njineerkaaga kuleyliyaha, hawo is-dhaafka iyo qaboojinta (HVAC) i ama lataliye.

Aaladaha nadiifinta hawada maaha beddelka hawo is-dhaaf wanaagsan, si kastaba ha ahaatee halka aanay suurtogal ahayn in la sii joogteeyo hawo is-dhaaf wanaagsan, qalabyada nadiifinta hawada ee isticmaalaya filtarrada HEPA ama UV waxay noqon karaan beddel waxtar leh oo lagu dhimo isugu gudbinta fayraska ee hawada. Waxyaabaha ay tahay in la tixgeliyo marka la isticmaalayo qalabka hawada lagu nadiifiyo waxaa ka mid ah in qalabku uu ku habboonaan doono cabbirka aagga iyo arrimo kale, sida sanqadha iyo dayactirka. CIBSE waxaa kale oo ay soo saartey hage ku saabsan tiknoolajiyada hawo nadiifinta.

Ficil kasta oo lagu wanaajinayo hawo is-dhaafka waa inaysan wax u dhimin dhinacyada kale ee badbaadada iyo amniga (tusaale, aan la furin albaabada dabka), waana in ay tixgeliyaan cawaaqibka kale sida caafimaadka iyo xaalad-wanaagga ee ka imanaysa raaxo la'aanta heer kulka.

Meesha aysan suurtagal ahayn in la bixiyo hawo wanaagsan isu dhaafta, waxaa laga yaabaa inaad rabto inaad tixgeliso tallaabooyin kale si aad u yareyso halista isugu gudbinta hawada. Kuwaas waxaa ka mid ah, tusaale ahaan, iska ilaalinta ficillada qaarkood meesha bannaan, bixinta nasashooyin hawo is-dhaaf inta lagu jiro ama inta u dhaxaysa isticmaalka qolka, ama isticmaalaya UV ama HEPA alada nadiifinta hawada.

## Hawo is-dhaafka gawaarida

COVID-19 iyo caabuqyada kale ee neef-mareenka ah waxay fidi karaan markay dadku ku safrayaan gawaadhida xidhan sida baabuurta iyo basaska. Kuwani waa tallaabooyin aad qaadi karto si aad u yarayso halista:

- fur dariishadaha. Furitaanka qayb ahaanta ah ayaa weli ku caawin kara haddii ay aad u qabow dahay in si ballaaran loofuro kuleyliyaha ayaana lagu dayn karaa si loo ilaaliyo heerkulka
- shid habka hawo is-dhaafka marka dadku ay saaran yihiin baabuurka - u deji inaad hawo cusub soo jiidato, oo aan ahayn in hawadii dib isugu wareegto
- furitaanka albaabada marka halka ay badbaado tahay in sidaas la sameeyo waxay kaa caawin doontaa inaad si

dhakhso ah u beddesho hawada - furitaanka daaqadaha si buuxda ayaa sidoo kale kaa caawin kara nadiifinta hawada gaariga

Hagahani waa dabeecad guud waana in loola dhaqmaa sidii hage. Haddii ay dhacdo iska hor imaad u dhexeeya sharci kasta oo lagu dabaqi karo (ay ku jiraan sharciga caafimaadka iyo badbaadada) iyo hagiddan, sharciga lagu dabaqi karo waa uu shaqayn doonaa.